

Retail Food Handler/Seasonal Permanent Food Stand



Macluumaadka dukumintigaan ku qoran waa kuwo dhaqan gelaya waqtigaan xaadirka ah ee taariikhda la daabacay. Maadaama shuruucdu isbedesho, waxaa muhiim ah inaad hubiso si aad u ogaato in shuruucda iyo nidaamyada maamulka ee ku khuseeya la bedelay ama wax cusub lagu daray. Dukumintigaan waxaa loogu talo galay tilmaam bixin oo kaliya, kumana qorna wax kasta ee lagaaga baahan yahay inaad sameyso. Waaxda Beeraha ee Minnesota (Minnesota Department of Agriculture [MDA]) ayaa go'aamineysa waxyaalaha dhabta ah ee looga baahan yahay shatiga marka ay dib u eegaan dhamaan arimaha ku saabsan ganacsigaaga cuntada.

1

Waxyaalaha koowaad ee lagala hadlayo xafiisyada gobolka, ama magaalada/degmada

- Isha biyaha
- Habdhiska Biyaha Wasakhda ah (bullaacadda)
- Shuruudaha kala-xadaynta ganacsiga cuntada
- Caymiska Magdhowga Shaqaalaha haddii aad qorsheyneyso in la siiyo lacag ama magdhow
- Kormeerista Dhismaha
- Kormeerista Dabka
- Kormeerista Biyo gelinta
- Kormeerista Koronto gelinta
- Kormeerista HVAC (Kulayliyaha Mukeyka)
- Shahaadada Degitaanka
- Dib-u-eegista Qorshaha Tafaariiqda
- Ruqsadaha kale ee laga yaabo inaad u baahato

2

Waxyalo kale oo ay tahay in la eego

- Barxad u helista ganacsigaaga
- Samaynta liis ah cuntada aad samayso, gaddo ama siiso dadwaynaha
- Garashada macaamiishaada
- Gunaanadka habka unto soosaarkaaga
- Halka aad ka helayso waxyaalaha aad cuntada ka samayso
- Helitaanka meelaha cuntada lagu kaydiyo
- Baakadaynta iyo summadaynta waxsoosaarka
- Sharciga Cuntada Minnesota(Minnesota Food Code) (MN Rule 4626 [Sharcuga MN 4626])
- Shardiga Maareeyaha Cuntada ee Muctarifka ah
- Tafaariiqda HACCP iyo Ogolaanshaha gaarka ah ee Sharciga Cuntada

3

Waxyaalaha loo baahan yahay ballanta shati-siinta ee aad la leedahay kormeeraha

- Lambarka Aqoonsiga Cashuurta MN AMA lambarka Sooshal Sikuuradka
- Caymiska Magdhowga Shaqaalaha haddii aad qorsheynayso in la siiyo lacag ama magdhow
- Jeegga ama Dalabka Lacagta (Money Order) ah ujrada shatigaaga.

Iyadoo la raacayo Xeerka Ameerikaanka Naafada ah, macluumaadkan waxa lagu heli karaa qaabab kala duwan oo isgaarsiineed marka la codsado iyadoo la wacayo 651-201-6000. Istimalaayaasha TTY waxay wici karaan Adeegga Gudbinta Minnesota 711. MDA waa loo-shaqeeye iyo bixiye loo siman yahay.